Erayga iyo Maanta Somtwt 0250
Madaxbannaanida Ilaah

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Madaxbannaanida Ilaah.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **Madaxbannaanida Ilaah** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu dhegaysnno qasiiddadan.

SONG: MUCJISAY AHAYD.

Waxaannu qaddar daqiiqado ah ka hadli doonnaa madaxbannaanida Ilaah, taasoo loola jeedo in Ilaah maamulka koonka haysto. Mararka qaar waxaannu intaan nool nahay arkaynaa inaan doonayno inaan innagu qabsanno maaraynta nolosheenna, waxayna ka hor imaadsan tahay xaqaa'iqa ah in Ilaah wax waliba sutida u hayo. Waxaan leenahay qasdi iyo afkaar ku aaddan dabiicadaheenna, rumaysadkeenna, iyo in noloshu dhinac nala aaddo ama aan leenahay qorshe, waxaanan iska dhaadhicinaynaa in qorshahaasu u hirgalayo sidii aannu ku taamaynay. Waxaana qorshahaasu uu ka hor imaadsan yahay doonista Ilaah oo ka weyn qorshayaasheenna, markaasaa xaaladuhu ka wecdaan sidii aynu doonaynay mararka qaar. Taasina murugo iyo niyadjab bay inagu dhalisaa. Laga yaabo haddaba in barashada doonista Ilaah iyo madaxbanaanidiisa ay inagu caawiyi lahayd inaan murugadaas iyada ah ka gudubno wakhtiyadaas markii

noloshu ayan u soconin sidii aynu doonaynay. Tan kowaad ee ay tahay inaan maanka ku hayno waxay tahay in marka la eego dhaqamada dunida maanta ay ku badan yihiin qaadashada afkaaraha tirada badan ee yaacaya dunida. Dabiicada ama fikirka nagu qodban waa inaan si kastoo ay tahayba aan noloshayada u dhigno sidaan doonno, ama u wajahno meeshaan doonno.

Waxaa jira tusaale badan oo ku saabsan qaadashada afkaaraha oo aad ku arki karto televisyoonaha ama jaraa'idyada. Waxaa ku badan oo aan qarsoonayn, anshax-xumada, macaasida, sarriig la'aanta iyo umuuro kale oo badan. Sida qaarkiin garanayaan, Giriigtii Hore waxay lahaayeen dhaqan loo yaqaanno dhex-dhexaadnimo, taasoo dhaqamada ama diimaha uusan qofku si asal raacnimo ah u qaadanaynin, amase uusan ka gaabsanaynin ama diidaynin, laakiin si qunyar socodnimo ah ayuu u qaadanayaa dhaqanka dadka ama afkaaraha la aaminsan yahay.

Waa hagaage maanta markii aad fiiriso dunida, wax kasto si waalli ah ayaa loo qaadanayaa. Dhaqankaas ayaa kuu muuqanaya markii aad eegto macaasida socota, iyo jacaylka mukhaadaraadka, iyo sida lacagta loogu dheelayo. Meelo badan ayaad arkaysaa in dadku ay balwadaha iyo afkaarahooda ay si waalli ah u qaataan. Waxaase murugo ah, inuu jiro fikir diini ah oo dadka qaarkood is leeyihiin Ilaah raalli buu ka yahay waxyaabo badan oo dhaqamadaas xun xun ah oo ka socda dunida, sida in Ilaah dadka u oggolaaday inay raaxaystaan, amase in dadku ay la baxsanayaan sharnimada, ama musuqa, iyo sida in Ilaah waxyaalahaas oo dhan uusan mashquul ku ahayn ama dabagelin.

Waxaad maqlaysaa mararka qaar dabiicado dadku ay aaminsan yihiin oo ay leeyihiin, haddii Ilaah

jecel yahay iyaga ma uusan oggolaadeen in sidan iyo sidaas ay noqdaan, ama si kale ayey u wareejinayaan oo waxay leeyihiin, Ilaah wuu I jecel yahay dabeecadahanna isaga ayaa I siiyey ama igu abuuray. Inkastoo shuqullada ama fikirrada ay aaminsan yihiin ay ka hor imaadsan yihiin doonista Ilaah, haddana sidaas bay u hadlayaan. Haddaba waa arrin la diriqsanaayo; iyo caqli foorara in la yiraahdo Ilaah wuu noo oggol yahay inaan samayno wixii aan doonno.

Isla sidaas oo kale, waxaan ka fakaraa ninka ku dirqinaya qof dumar ah oo ku leh, haddaad I jeceshahay kaalay aan sinaysannee. Waa wax la diriqsanayo! Waana arrin fashaxaar leh in sidaa lagu fakaro intii la qaadan lahaa fikirka quman ee jacaylka, oo ah in ninku naagta guursado oo ay u wada dhaqmaan sida nin iyo naagtiis.

Xaqiiqatan, jacaylku maahan in loo fasirto qaadashada afkaaraha qaar, Ilaah dantiisu ma ahan nugayl. Taasina waa mid ka mid ah asbaabaha dad badani ay Ilaah uga tegayaan, waayo waxay doonayaan inay sharnimo sameeyaan, iyo inay noqdaan kuwa u dabacsan jirka iyo damacyadiisa sharka leh. Waxayna cududaar u raadiyaan xaalkaas, laakiin runtu waxay tahay inay doonayaan inay sameeyaan damacyada dunida, oo doonina maayaan inay toobadkeenaan.

Haddaan runta idiin sheego, dadkaasi waxay doonayaan inay dembiileyaal ahaadaan, kuwaasoo ka fakara waxyaalaha dunida. Markaasina, Waxay isku taxluujinayaa inay u macnaystaan Ilaah iyo Baybalka sharci-dejiyayaal. Baybalkana bay leeyihiin, waxaa ku qoran sharciyo uu isku keen hoos keenayo. Waa hagaag, dabcan oggolaan mayaan dabiicadaha Ilaah ee leh naxariista, galgacalka,

iyo jacaylkaba. Intii ay taa qiri lahaayeen, Ilaah bay ka dhigayaan wax kale iyo sida mid doonaya inuu iyaga ka dhigto addoomo, iyo sida inaanu lahayn jacayl iyo raxmad sida aabbe oo kale. Waa hagaage, Ilaah waa khasab inuu mararka qaar nagu yiraahdo Maya, taasoo aalaaba innaga inoo wanaagsan. Xaqiiqatan, ilmahaaga marar badan wixii ay ku weyddiistaan waxaad ku tiraahdaa maya, waayo waxaad og tahay in waxaasu ayan iyaga u wanaagsanayn.

Haddii cunuggaaga doonayo inuu taabto burjuko kulul, waxaa ku leedahay, "Maya" ha taaban, oo waxaa suuragal ah inaad gacanta ka dharbaaxdo si uusan u soo aadin. Dooni maysid in ra'yigaaga laga hor yimaado, iyo in xukunkaaga guriga ay ilmuhu yaraystaan iyagoo doonaya in xoriyaddooda la dhowro. Waa maxay xoriyadda ay heli karaan, weliba caqligoodu ma buuxsamine?

Waxaa la mid ah Ilaah marka uu inagu leeyahay, ka fogaada macaasida, iyo mukhaadaraadka, iyo isticmaalka daroogada. Wuxuu garanayaa in waxyaalahaasi ay noo horseedayaan daanno, iyo burbur, markaasuu inagu leeyahay, "Maya!" Welibana, kibirkooda dartii ayaa dadku wax waliba u sameeyaan.

Waxaan doonaynaa inaan la baxsanno wax kasta ee aan doonno, markaasina masiixinnimadu waxay inoogu baaqaysaa ama yeeraysaa nidaam ka duwan aqbalista afkaaraha dunida. Markii qofi masiixi noqdo, kol dambe samayn maayo wax kasta oo uu jeclaysato inuu sameeyo. Dalka Maraykanka lixdamaadkii waxaa jirtay halhayska leh, **"Samee wixii kula hagaagsan, oo samee wax kastoo aad dareemayso inay wanaagsan yihiin."** Ingiriisi ahaan halku dheggu wuxuu ahaa: "Do what feels

right and do what feels good.” Waa sidaase, taasina wa habka ugu wanaagsan ee aad noloshaada oo dhan u kharibi karto. Masiixinnimadu waxay noogu baaqaysaa inaan diidno waxyaalaha nafsaddayadu doonayso. Waxaan markaasi jeclaan lahaa inaan idinla wadaago qidco ka timid Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka Kolosay cutubka 3aad, oo arrinkan isaga ah ka hadlaysa, oo maankiinnana u jeedinaysa waxyaalaha Ilaah intaad u jeedin lahaydeen hadba waxaad maagto. Waxaana ku qoran 3:1-4 sidatan:

“Haddaba haddii laydinla soo sara kiciyey Masiix, doondoona waxyaalaha korka yaal, meesha uu Masiixu joogo, isagoo fadhiya midigta Ilaah. Ka fikira waxyaalaha korka yaal, hana ka fikirina waxyaalaha dhulka yaal. Waayo, idinku waad dhimateen, oo noloshiinnuna Masiixay kula qarsoon tahay Ilaah. Masiixa oo ah nolosheenna, markuu soo muuqdo, kolkaasaad idinkuna ammaan kula soo muuqan doontaan.”

Bal eeg sida aayaddu inoogu sheegayso laba goor inaan maanka gelinno **waxyaalaha korka yaal**. Markii Qorniinku uu ku noqnoqdo sheey, oo dhowr jeer la adkeeyo, waa wax aad iyo aad muhiim u ah inaan dhug u yeelanno. Waana wax ahmiyaddeedu sarrayso. Maahan oo keliya dood ama afkaar; waa canaan iyo wax laynagu adkaynayo. Waxay kaloo ka macne tahay in xaajadu ay tabanayso dadaal dheeri ah. Haatan, Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah ayaa kuugu yeeraya inaad ku kalsoonaato Ciise Masiix, wuxuuna doonayaa inuu dhexdaada yimaado si aad fikirradaada u beddesho, oo uu kuu siiyo xoog aad ku raacdo doonista Ilaah. Ma jiro qof qalbigiisa gelin kara waxyaalaha sare oo ah waxyaalo dhab ahaan rabbaani ah oo wacan haddaanu Ruuxa Qoduuska

ah ka dhex shayqnaynin qofka. Markaasina, haddii Ilaah kuu yeerayo, oo aad qalbigaaga ka garato inaad u baahan tahay isbeddelka nolosha, iyo inaad ka toobadkeento dembigaaga, oo aad u baahan tahay inaad u timaaddo Ciise ee aad doonayso nabaadiinadiisa-ayaa ruuxu noqonayaa kan Ilaah ee kaa dhex shaqaynaya.

Dabadeetana Ruuxu wuu ku kicinayaa si aad maankaaga ugu jeediso waxyaalaha Ilaah. Qof kasta way qabsan kartaa hawl adduun, mana ahan wax adag in hadallo aan habboonayn inaga soo baxaan; mana ahan wax adag in qofi ku taamo inuu noqdo tujaar oo damac galo, iyo inuu awood yeesho. Waxyaalahaas oo dhan waa waxyaalaha dunida, qofkana damac baa kaxayn kara. Mana ahan inaad leedahay xirfad iyo awood aad waxyaalahaas kaga baaqsan karto.

Waxa keena awoodda Ilaah noloshaada waa inaad marka hore maankaaga iyo qalbigaagaba aad kaga fakarto waxyaalaha korka yaal. Sida ku qoran Warqaddii reer Galaatiya 5:22-22 ayaa laynagu xusuusinayaa miraha Ruuxa, waxaana qoran: **"Laakiin midhaha Ruuxu waa jacayl, farxad, nabad, dulqaadasho, roonaan, wanaag, aaminnimo, qabownimo, iscelin."**

Waxaan aalaaba iraahdaa qofku wuxuu u huri karaa noloshiisa oo dhan isagoo isku taxluujiya horumarinta dabiicadahaas markii uu yahay qof masiixi ah, oo adigana taas diiradda waad saar kartaa si aad ku yeelato dabiicadahaas wanaagsan. Kuwaasina waa waxyaalaha korka yaal. Markii aad tahay qof baayac-mushtar ah, oo, aad garanayso sida loogu baahan yahay daacadnimada, ayaa inaad gaarto heerkaas ku heli kartaa oo keliya inaad ka fakarto waxyaalaha korka yaal. Markii aad gabar shukaaminayso oo doonayso inaad guursato, laakiin

aadan macsiyeysan, ayaa taasu imanaysaa markii aad ka fakarto waxyaalaha korka yaal. Waana waxa aynu ka hadlaynay, laakiin waxaad wax waliba u samaysaa markaad leedahay dabiicaddaas, nabaadiinada Ilaah ku siinayo, si noloshaadu ay u noqoto mid ujeeddo leh oo ku xiran Ciise iyo kuwa kale ee doonaya inay u yimaadaan Masiixa, oo garowsan in ficilkeenna, iyo hadalkeennaba ay tahay inaan ku ammaanno Masiixa, taasuna waxay imanaysaa markaad maskax ahaan ku xirantay waxyaalaha korka yaal.

Waxaa kaloo halkan laynagu siiyey ballan caaqibo leh marka Qorniinku leeyahay, **"Masiixa oo ah nolosheenna, markuu soo muuqdo, kolkaasaad idinkuna ammaan kula soo muuqan doontaan."** Runtiina, qofkii badbaaday, oo dembigiisii laga soo furtay, nolosha waxaa u ah Masiixa, oo Masiixa la'aantiis cadaabi kaama dheera, dhibka ku hayana waxaa u sabab ah inaad siddo culaabta iyo natiijada dembiga. Waxaad u baahan tahay inaad toobad-keento, waana sababta loo leeyahay, "Masiixa oo ah nolosheenna."

Waa isaga kan ina siiyey hadiyadda saamaxaadda iyo nolosha daa'imka ah. Waxaan ku noolaanaynaa rajadaas, kuwa diidana waxay baabi'inayaan noloshoda, oo waxba kama jiraan ay ka dhigayaan. Qiro sarraynta Ilaah ee xaaladahaaga, toobadkeen, oo qiro dembigaaga, qalbigaagana geli waxyaalaha kor yaalla. Oggolow in Ilaah ku hago, ku faraxanow in Ilaah iska leeyahay qorshaha noloshaada.

SONG: MUCJISAY AHAYD

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe

(saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505.
Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.